

ALEELAQAAD : (Ilmaha marka uu bilaabo wax kasta oo dhulka yaal inuu gacanta ku qaato afkiisana geliyo ayaa la yiraahdaa waa Aleelaqaad ama abeeso xambaar, xilligaas ilmuhu wuxuu isku dayaa inuu ka xoroobo wixii hooyadu siin jirtey oo isagu iskiis isu quudiyo hayeeshee tallaabadaasi ma mahadiyo, waana xilliga ilmaha cudurrada ugu badani ku dhacaan)

Maansadani waxay qayb ka tahay barnaamijyada toosinta iyo la-talinta u ah dawladda waana muraayad la doonayo inay dawladdu ka aragto meelaha inay iska toosiso looga baahan yahay.

Qofka bartay aqoonta diinta ee xil qabta waxaa xanniba cabsi uu ka cabsanyo in aakhiradiisu ay u hagagsanaan weydo taasina waxay ku xanbaartaa dhawrasaan, maaddaama **ISTICDAADU YAWMUL MIICAAD** uu maanka ku hayo mar kasta iyo meel kasta, qofka bartay aqoonta maaddiga wuxuu ilaashadaa sumcaddiisa ayaamaha nolosha uga harsan mana ku dheereeyo inuu badiyaa si qaawan u qooraansado wixii la ag dhigtay, qofku haddii maadiga iyo diinta midna aanu wax ka aqoon ama labadaba bartay aanuse midna tixgelin oo xil loo dhiibto wuxuu u shaqeeyaa saddexdiisa J taasina waxay ku xambaartaa in aanu u aabbayeeliin saddexdaas J waxaa imanaya meesha ay ka imanayaan.

Maansadan oo aan ku halqabsaday nin saaxiibkay ah oo Axmed Macallin la yiraahdo oo aan aaminsanahay intaan dad bartay inuu ugu xalaal-cun-san-yahay waxaan uga warramay sida maamulka Puntland uu iila muuqdo shakhsi ahaan, iyadoo tixgelinteedana aan siiyey in dadku sida aanay u wada wanaagsanayn aanay haddana u wada xumayn ee xil-hayeennadu is-dhexyaallaan.

- | | |
|------------------------|----------------------------------|
| 1. Axmed macallinow | Inkastoo Ikhyaar |
| 2. Iyo odayo weli | Aamini jiraan |
| 3. Intabadan dadkaan | Arrimaha Puntland |
| 4. Hadda loo igmaday | Waa aleelaqaad |
| 5. Abeesiyo anfaco | Hadba kay arkaan |
| 6. Afka kula hormara | Aramida suntana |
| 7. U adkaysi badan | ALLA- ka -cabsigana |
| 8. Eber waa ka hoos | Istaxyena ma jiro. !!!!!!! |
| 9. Axmed Macallinow | Waxa eegga jira |
| 10. Afar fuusto iyo | Oodafiyo hangool |
| 11. Iyo udub nin leqey | Oonay laba ahayn |
| 12. In iniin qariyo | Asparo wax le'eg |
| 13. Afka uu gashaday | !!!!!!!!!!!!!!!!!!!!!!! |

- | | |
|-------------------------|--------------------------|
| 14. Axmed Macallinow | Ashqaraarka jira |
| 15. Qofkaa Eelka dhigay | Waa ruux afkiyo |
| 16. Uurkaba ku le'eg | !!!!!!!!!!!!!!!!!!!!!! |
| 17. Agaasime ku sheeg | iyo odayadaan |
| 18. Adeegyda ku mabay | Alamsade sidii |
| 19. Indhihii shacbigu | Amag wada noqdeen |
| 20. Oon cidi arkayn | Waxse aanay ogayn |
| 21. Il hadday dabaan | Dadku inay arkaan |
| 22. Uurka kii dabana | Ummadani inay |
| 23. ILAAH leeyihiin | Oo lagu ogyahay |
| 24. Eed kastoy galaan | |
| 25. Axmed Macallinow | Intii uu Puntland |
| 26. Udubkeed mudnaa | Axad weli u xiran |
| 27. Ummadaan arradan | Inuu eed ka galay |
| 28. Ama oon ka cunay | Ma aqoonsantahay!!!!!! |
| 29. Axmed Macallinow | Alifleydan gabay |
| 30. Eedayn inaan | iska urursadiyo |
| 31. Aabi haw filin | Indha-xumada taal |
| 32. Iskuulaadka iyo | Isbataalladiyo |
| 33. Arrimaha bulshada | Hadda saa u eeg |
| 34. Askartaan mushaar | Indhoweyd arkine |
| 35. Aarmiga sitoo | Iska Oomman eeg!!! |
| 36. Axdigay ku taal | Qofkii iin arkaa |
| 37. Inuu oran karoo | Umaraa'da iyo |
| 38. Ummadiyo Shacbiga | U iftiimiyee |
| 39. Afka waxaqabsaday | Indheergaratadiyo |
| 40. Aqoonyahannadiyo | Abwaanadii kalaan |
| 41. Weli ii ifbixin. | Caku Aamusnida!!!!!!!!!! |
| 42. Caku aamusnida | Caku Aamusnida!!!!!!!!!! |

MMX-Gaani, August, 2005

Tel:2525755782/2525441743, Email:mmhgani@yahoo.com